


Hel daryeelka saxda ah markii aad u baahantahay.

Waxaad haysataa dookhyo badan ood ku maareeyso caafimaadkaaga.



Health Link

Haddii aad qabtid walaaca caafimaadka ama aadan hubin halkaad u aado caawinaad, kala hadal kalkaaliso midaa si bilaash ah adoo helayo tallada taleefonka iyo adeegyada warbixinta caafimaadka, waqti waliba.

Si aad ula xiriirtid Health Link 24/7: Garaac **811**



Family Doctor

Dookhaaga ugu wanaagsan ee baahiyada caafimaad ee socdo, inta badan dhaqaatiirta qoyska waxay ka qeyb yihiin Shabakada Daryeelka Asaasiga ah(xirfadlayaasha caafimaadka oo kawada shaqeynayo isku-xirka daryeelkaaga caafimaad).

Si aad u hesho dhaqtar qoys: Garaac **811**.



Xarumaha Daryeelka Degdega

Helitaanka saacada loo kordhiyay walaacyada caafimaadka ee aan nolosha halis ku ahayn ee aan la filaneyn, sida lafo jajabka, xanuunka, caabuqyada iyo jeexyada.



Xarumaha Daryeelka Ambalaaska

Daryeelka dhow oo degdega ah, laakin aan ahayn xaaaldaha nolosha halista ku ah, oo ay ku jiraan jirooyinka ku soo boodka ah ama dhaawacyada.



Xarumaha Daryeelka Qoyska

Daryeelka saacadaha la kordhiyay, gaar ahaan kuwa u baahan dhaqtarka qoyska, qabo cudurada raago, ama qabo qabatin ama baahida caafimaadka maskaxda.



Xarumaha Jaaliyadaha iyo Caafimaadka Bulshada

Adeegyada waxaa ku jiro: dhalmada ka hor, sare u qaadida caafimaadka, ka hortaga cudurka iyo dhaawaca, iyo inbadan.



MyHealth.Alberta.ca

Websaydkaan waa meesha kaliya ee aad ka heshid warbixinta caafimaad ee lagu kalsoon yahay iyo aaladaha wax ku oolka ah ee caafimaadka, oo ay ku jiraan baaraha aastaamaha.



Farmashiistayaasha

Cusbooneysii qoraalada dhaqtarka, qiimey aastaamaha xaalada, bixi daaweyn ama u gudbi goobta daaweynta aadka ugu haboon.



Xarumaha caafimaadka Furan

Kuwa badan waxay bixiyaan saacado la kordhiyay oo ku caawinayo walaacyada sida murgacashada, caabuqyada dhagaha iyo aastaamaha hergabka.



Waaxyada Degdega

Kuwa aadka u xanuunsan ama u dhaawacan. Bukaana qaba xaaladaha nolosha halista ku ahaan kara waa inay isla markaas soo wacaan 911.